# Cuntada Iswiidhan – qeybta 2aad

## Wareysiyo iyo su’aalo ku saabsan hab dhaqanka cuntada ee dadka waaweyn. Cilmibaaristaan ayaa loogu talo galay dadka deggan Iswiidhan ee ku dhashay Iswiidhan, Suuriya, ciraaq ama Soomaaliya si ay tixgelin u siiyaan dhaqamada kala duwan.

Waxaa hubiyay hay’adda anshaxa ee Iswiidhan, taariikhda 2020-05-11 (DNR 2020–01382)
Dib loo eegay 2020-08-20 (DNR 2020-04129)
Dib loo eegay 2021-03-30 (DNR 2021-01353)
Dib loo eegay 2021-08-19 (DNR 2021-03897)
Dib loo eegay 2022-04-05 (DNR 2022-01604)

### Soo koobid gaaban iyo martigelin

Cilmi baaristaan waxaan rabnaa inaan helno aqoon dheeraad ah oo ku saabsan waxa ay cunaan dadka dhaqamada kala duwan leh. Waxaan ku weydiin doonaa waxaad cuntoiyo sida loo kariyo. Xogtaan waxaan rabnaa inaa ku horumarinosu’aalaha jira ee ku saabsan cuntada iyo caadooyinka cuntada si ay u noqdaan kuwo khuseeya bulshada Iswiidhan oo dhan. daraasadaan cilmi baarista ah waxaan kaa codsan doonaa inaa buuxiso foomka su’aalaha ku saabsan doorashadaada cuntada.



### Ujeedada iyo asalka cilmibaarista

Cuntadu waxar door muhiim ah ka cayaartaa ilaalinta caafimaadka. Iswidhan (iyo dalal kale oo badan oo EU ah) waxaa si joogta ah loo sameeyaa baaritaano ku saabsan cuntada iyo caadooyinka cuntada dadweynaha si loo eego in talooyinka rasmiga ah ee cuntada loo baahanyahay in wax laga bedelo.  Baaritaannada illaa hadda la sameeyey kuma fiicneyn markasta in lagu cabbiro nafaqada qof walba. Gaar ahaan dadka aan u dhalan iswiidhan.
Si aan u helno fikrad wanaagsan oo ku saabsan waxa qof walba uu adeeganayo, waxaan dooneynaa inaan aqoon ka helno cunnooyinka iyo caadooyinka cunto ee ku saleysan dhaqamada gaarka, oo ay ku jiraan cuntooyinka aan loo aqoon dhaqan ahaan Iswiidish. Daraasadani waxay ku saabsan tahay sameynta baaris hab dhaqanka cunnida ee qowmiyadaha ugu waaweyn ee aan asal ahaan aan yurubta ahayn ee ku nool Iswiidan, gaar ahaan Siiriyaanka, Ciraaqiyiinta iyo Soomaalida.
Waxaan ku martiqaadeynaa dadka soo booqanaya xarumaha daryeelka carruurta och xarumaha qoyska iyo ka qeybgalayaasha kooxaha waalidiinta inay ka qeyb qaataan daraasada. Waxaan aaminsanahay in tirada ka qeybgalayaasha daraasada ay noqon doonaan ku dhowaad 132. Waxaan dooneynaa in si fudud aan daraasadaan ugu baarno sida ay hadda u egyihiin caadooyinka guud ee cunadaada. Waxaan xiiseynaa kala duwanaanta ka

jirta caadooyinka cunida iyo cunnooyinka ka jira Iswiidhan iyo sida cilmibaareyaasha ay u doonayaa inaan hab sax ah u cabirno caadooyinka cunitaanka ee dhammaan dadka Iswiidhan ku nool.
Iyada oo laga tixraacayo waxa aanu ku ogaan doono daraasadaan ayaan hormarindoonnaa waydiimo loo isticmaali karo  daraasadaha qaran ee mustaqbalka ee ku saabsan caadooyinka cuntada ee bulshada si guud ahaan. Daraasad ku xadidan gobolka Örebro ayaan u isticmali doonnaa foomka su'aalaha la hormariyey si loo baaro xiriirka ka dhexeeya cuntada iyo horumarka koriinshaha carruurta.

## Maxaa la iga filaayaa inaan sameeyo haddii aan ka qeyb qaato daraasadda?

Dhamaan macluumaadka aan soo ururinay inta lagu guda jiro qeybta koowaad ee daraasadda waxaan sii horuumarineynaa weydiimaha waxaana soo saareynaa nooc cusub oo foomka ra'yi weydiinta ah.
**Qeybta ugu dambeysa ee daraasadda waxaan ka codsan doonaa qof walba inuu nala yeesho saddex wareysi oo gaagaaban si aan u wada buuxino foomka ra'yi weydiinta. Waxaana la xiriiri doonaa dhamaan ka qeybgaleyaasha si aan ugu heshiino maalinka iyo waqtiga ugu haboon ee aan foomka ra'yi weydiinta buuxin karno.**



Wareysiga waxaa lagu sameynaayaa wicitaano maqal iyo muuqaal ah oo Iswiidhish ah, laakiin hadii aad doorbideysid inaa luqadaada ku hadashid waxaan kuu diyaarineynaa turjubaan. Waxaan sidoo kale u kulmi karnaa "fool ka fool" meeshii adiga kuu haboon (tusaale ahaan Xarunta qoysaska, maktabada ama jaamacadda), laakiin haddii aad doorbideysid waxaan ku kulmi karnaa gurigaaga. Inta wareysiga lagu guda jiro waxaan isla fiirineynaa foomka ra'yi weydiinta cuntada. Wareysiga wuxuu qaadanaa qiyaastii 30-45 daqiiqo, laakin waqti ka badan ayuu qaadanaa haddii uu turjubaan nala joogo.
Wareysiyada labaad iyo saddexaad ka hor, waxaan kaa codsaneynaa inaa buuxiso foomka ra'yi weydiinta cuntada, isla maalinka aan wareysiga kula yeelan doono. Ugu dambeyn waxaan ka codsaneynaa dhamaan ka qeybgaleyaasha ku dhashay Iswiidhan inay buuxiyaan foom kale oo ra'yi weuydiin ah.

## Ma jiraan wax faa'iido ah oo laga helayo ka qeybgalka?

Inaad ka qeybqaadato kuma heleysid wax faa'iido toos ah si shaqsi ahaan adiga ama ka qeybgalayaasha kale, laakiin marka laga howlgalo natiijooyinka ayey daraasadaha mustaqbalka noqon doonaan kuwa si wanaagsan u cabiraya caadooyinka cunnadaee dhammaan bulshada Iswiidhan. Taasoo ina siineysa sawir sax ah oo ku saabsan cuntada iyo habka cunnada ee Iswiidhan.



## Ma jiraan wax khasaarooyin ama khataro ah ee ku aadan ka qeybgalka?

Ma jiraan wax khatar caafimaad ah oo ku aadan ka qeybgalka daraasaddan cilmi baarista ah. Kuma siin doono wax warqado caafimaad ah ama ma sameyn doontid hanaan caafimaad oo ku dhaawacaya. Ujeeddada daraasaddu ma ahan inaan si uun u qiimeyno caadooyinkaaga cunida, sidoo kalena kaama



codsaneyno inaad wax uun ka bedesho waxaad cuneyso. Kaliya waxaan kaa codsaneynaa inaad dhowr jeer buuxiso foomka waydiimaha iyo haddii ay timaado inaad ka qeyb qaadato wareysi.

## Maxaa dhacaya haddii aanan rabin in aan sii wado ka qayb qaadashada daraasada?

Ka qayb qaadashada daraasadan waa tabarucaad aan khasab ahayn. Haddii aad doonto waad diidi kartaa ka qayb galka daraasada ama waxaad samayn kartaa in aad soo gabagabeeyso ka qayb qaadashadaada daraasadii oo aan wali dhamaan, kumana qasbanid in aad sheegtid sababta. Taasina saamayn kuma samaynayso daryeelka caafimaad ee aad xaqa u leedahay.

## Maaraynta ku saabsan daraasada

### Sidee loo dhowrayaa xogtayda shaqsiga?

Ujeedada daraasada marka la eego ayaa waxa aanu u baahanaynaa in aanu ku weydiiyno su´aalo ku saabsan asalkaaga iyo waddanka aad ku dhalatay. Macluumaadka aanu doonayno inaan isku soo uruurino waxaa kaliyaoo la isticmaalayaa haddii aan ku aanu ku weydiino su´aalahaasi. Ma keydin doono wax macluumaad ah oo aan ka ahayn su´aalaha cilmi baarista iyo wareysiga  aanu kula yeelan doono.
Xogta cilmi baarista waxaa lagu keydin doonaa jaamacada kombiyuutaradeeda keydinta waxaana loo xifdin doonaa si munaasab ah oo habboon. Xogta aanu uruurinayno waxaa ka mid ah macluumaad xasaasi ah oo shaqsiyadeed oo la isku soo uruurinayo, loo wareejinayo oo loo keydinayo si la sugay oo hubaal ah. Xogta qofka lagu aqoonsan karo sida magaca, ciwaanka iyo taariikhda dhalashada waxaa loo keydinayaa si gaar ah oo isku meel laguma keydinayo xogtaas iyo jawaabihii aad bixisay.
Si ay cilmi baareyaashu uga shaqeeyaan xogta la isku soo uruuriyay (tusaale ahaan ka qayb galayaasha lala xiriiray, baarista xogta iyo isku soo uruurinta natiijada inta aan la daabicin), waxa ay ku qasbanyihiin inay raacaan shuruucda dhowrista xogta shaqsiga. Sidaas aawgeed ayaa cilmi baarayaasha loo tababaraa arinkaas oo waxaa ka shaqaynaya oo kaliya cilmi baare ruqsad u heysta, saxiixay heshiiska isku gudbinta xogta aqoona u leh sida loo qaabilo xog sir ah (haddii si kale loo yiraahdo xog aysan la socon magac, ciwaan, taariikh dhlasho iyo wixii la mid ah).

### Dhowrista xogta shaqsiga



Jaamaca Örebro waxa ay daraasaadka u samaysaa ayada oo la samaynayo xog uruurin sida ay ku jirto maslaxada umada. Haddii aad u baahato in aad ogaato wixii kugu saabsan oo aanu diwaangalinay ama wixii aragti ah waxa aad kala xiriiri kartaa matisverige@oru.se. Xogta aanu uruurino waxaanu keydinaa ilaa 10 sannadood. Su´aalaha ku saabsan sida ay jaamacada Örebro u xifdiso xogta shaqsiga waxa la weydiin karaa waaxda dhowrista xogta ee jaamacada oo ciwaankeedu yahay dataskyddsombud@oru.se.



Cabashooyinka aanay xallin karin jaamacada Örebro waxaa loo gudbin karaa waaxda dowliga ah ee dhowrista xogta ee lagu magacaabo Datainspektionen.

## Daraasada yaa maalgalinaya oo abaabulaya em organiserar?

Daraasada waxaa ka masuul ah machadka daawada iyo culuunta seyniska ee jaamacada Örebro. Daraasada waxaa maalgalinaya jaamacad Örebro qaybta maalgelinta iyo qorsheynta cilmi baarista ee ”Mat och Hälsa” ayada oo la kaashanayo is maamulka gobalka Örebro. Waxaa kale oo su´aalaha ku sabsan cunta dhinaca internetka nagu taageeray hey´ada dowliga ah ee cuntooyinka.

## Yaa faafreebay daraasada?

Daraasada waxaa faafreebay dhinacyada soke ee ku shaqada leh iyo hey´ada dowliga ah ee anshaxa daraasaadka.

## Magdhabid

Haddii aad soo bixisay kharash la xiriira socdaalka aad ku timaaday wareysiga waa laguu soo celinaayaa. Magdhawga waxaa uu ku saleysan yahay kharashka baska. Marka aad dhameyso daraasadda oo dhan waxaan ku siin doonaa kuboon ah 200 koroon, ama 300 koroon haddii aad sidoo kale dhameystirtay wareysigii dheeraa ee qybta ugu horeysay daraasadda.

## Shaqaalaha adeega caafimaad looma sheegayo

Wixii xog ah iyo jawaabahaaga daraasada ee aad na siiso sinaba looma gudbinayo hey´adaha adeega caafimaadka. Haddii ay kugu soo dhacaan su´aalo ku saabsan cunto inta ay daraasadu socoto ama xitaa marka la soo gabagabeeyo dabcan waad kala hadli kartaa su´aalahaasi shaqaalah adeega caafimaadka. Haddi aad ka qayb qaadato daraasada (ama aad xitaa iska diido in aad ka qayb aadato) taasi kuguma noqonayso caqabad kaa hor istaagta in aad hesho adeeg caafimaad oo hufan.

## Sidee ayay bukaanku iyo bulshadu uga qayb qaateen daraasaadkii hore?

Foomka su´aalaha ee aan adeegsanayno daraasadan waxaa gundhig looga dhigay daraasadihii horay loogu sameeyay cuntada ee Iswiidhen. Si aan u sii wanaajino foomamka su´aalaha ayaan waxa aanu la xiriirnay xitaa dad ka tirsan bulshada oo asal haan kasoo jeeda waddamana bariga ka xiga badda Mediterranean-ka. Dadkaasi aanu la xiriirnay waxa aanu weydiinay su´aalo ku saabsan cuntooyinka iyo xilliyada caadiga ah ee ay wax cunaan.

## Maxaa lagu samaynayaa natiijada daraasadan cilmi baarista ah?

Jawaabaha foomka su´aaloweydiinta iyo wareysiyada waxaa lagu samayn doonaa isku shaandayn ayada oo lagu dhafayo ka qaybgalayaal aad isku gobol ku dhalateen. Kadibna waxaa baaritaan ku samayn doonaa macluumaadka nooga soo baxa. Haddii ay noo soo baxaan cuntooyin iyo caadooyin cunto oo ka duwan kuwa swiidhishka, waxa aanu markaasi isbadal waafajin ah ku samayn doonaa qaabka su´aalaha daraasaadka cuntada ee hadda jira. Sidaas waxaa u samaynaynaa in aan u fududayno dadka ka qayb qaatayaasha ah ee ka qayb

qaadanaya daraasaadka mustaqbalka – Taasi waxa ay suurta galinaysaa in jawaabaha laga dhex heli karo cuntada caadi ahaan uu qofku cuno, waxaa kaloo suurta galaysa in qofku uu ka jawaabo su´aalo ka turjumaya cuntooyinka uu caadiyan cuno.
Natiijada daraasadaan cilmi baarista ah waxaa loo isticmaali doonaa daraasado kale oo cilmi baaris ah, oo ay ku jirto daraasad waddanka oo dhan ah oo ku saabsan caadooyink cunto ee Iswiidhen (Riksmaten.) Wxaa kale oo loo isticmaali doonaa daraasad kale oo laga leeyahay ujeedo fog laga leeyahay oo ka dhici doonta gobolka Örebro län taas oo lagu darsayo cuntooyinka, koriinshaha carruurta iyo caafimaadka ee gobolka

## Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan xiriirka

Ma rabtaa warbixin dheeri ah oo ku saabsan daraasadda, nagala soo xiriir:

Taleefanka /SMS/WhatsApp: 0790 61 89 89 (Zeinab) / 0790 61 40 20 (Marleen)

E- meyl: matisverige@oru.se.

www Bogga internetka: www.oru.se/matisverige